



Federal Government of the Somali Republic  
National Intelligence & Security Agency

JUNE 22, 2015

**War Saxaafadeed**

Abaare 10:09pm ee 21.06.2015 saldhiga Booliska iyo Xarunta Degmada ee magaalada Baar-dheere ee gobolka Gedo waxay Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka Soomaaliyeed ee NISA ka fuliyeen 2 weerar oo si aad ah loo qorsheeyay, waxaana fuliyay unug ka tirsan shabakado si gaar ah loogu diyaariyay howlgalada noocaas ah.

Weerarka oo loo adeegsaday Bam gacmeedyo iyo garneedyo waxaa lala beegsaday Horjoogayaal UGUS ah oo kulan ku lahaa goobtaasi, xilli ay isla 21.06.2015 ay ka soo laabteen goob loo yaqaan DAAR oo 30km u jirta magaalada, halkaasoo ay ku sagootintiyeen maleeshiyaad ay u direen howl-gallo.

Waqtiga uu weerarku dhacayay waxaa xarumahaasi goob joog ku ahaa horjoogayaal iyo maleeshiyaad tiro badan oo ay ka mid yihiin:-

- 1- Madaxa Siyaasadda & Gobolada ee ururka UGUS.
- 2- Waaliga UGUS ee gobolka Gedo.
- 3- Madaxa jabhaadka UGUS ee Gobolka Gedo.
- 4- Madaxa Xabsiyada (maxaabiista) ee ururka UGUS iyo kuwo kale oo badan.

**FAAH FAAHIN:-**

- Weerarkan wuxuu jawaab u yahay falalka argagixiso ee UGUS ku dhibaateeyaan danaha iyo masaalixda umadda soomaaliyeed, kuna beegsadaan shacab biri-mageydo ah iyo dadka wax tarka u leh Bulshada oo ay ugu dambaysay qaraxii ay la beegsadeen guriga shacab deganyihiin oo ku yaallo Deg. Shibis 21/June/2015.
- NISA waxay wacad ku mareysaa in weerarada noocan ah oo ku cusub Soomaalida ay sii badin doonaan, waxaana dhici doono kuwo kale oo lagu iloobi doono waxa ka dhacay Baardheere.

**MAHADSANIDIIN**